# Hagitaanka Qandaraaska

Hagitaanka waxa uu hayaa macluumaad dheeraad ah oo lagu sharaxaayo Qandaraaskaada Shaqada ee aad gurigaaga ka kiraysanayso United Welsh.

**Qandaraaskaagu wuxuu qeexayaa xuquuqdaada iyo masuuliyadahaaga qandaraas-hayste ahaan.**

**Anaga, adiga iyo United Welsh labadiinaba, waa in aan raacnaa shuruudaha qandaraaska.**



# Tusmada

Faahfaahinada xidhiidhkaada . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 3
Oggolaanshaha ku aadan wax ka beddelitaanada guriga . . . . . . . 4
Gudbinta gurigaaga kadib markey dhimasho kugu timaado . . . 6
Dhaqanka lidka ku ah hab-dhaqanka bulshadae . . . . . . . . . . . . . . . . 12
Wadajir u-haystayaasha qandaraaska . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 15
Dhameeynta qandaraaskaada . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 18
Macluumaadka kale ee muhiimka ah . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 20
Xusuus Qoritaano . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 21

# Faahfaahinada xidhiidhkaada

**Maxay tani ku saabsan tahay?**

United Welsh waa inay haysataa faahfaahinada xidhiidhkaada ee saxda ah

**Maxaan u baahanahay inaan sameeyo?**

Inaan u sheeg United Welsh isbeddellada ku yimaada faahfaahintayda meelaha la iigala soo xidhiidhi karo

Aad ayey muhiim u tahay in United Welsh ay hesho faahfaahinada xidhiidhkaada saxda ah. Tani waa si aan kaagala hadalno qandaraaskaada haddii aan u baahanahay.

**Inaad bixiso:**

- Magacaaga
- Lambarka taleefonkaadau
- cinwaanka iimaylkaada


Haddii faahfaahinadani isbedelaan, waa inaad noo sheegtaa. Waa inaad sidoo kale nagu soo wargelisaa cidda kula nool.

Waxaad ka cusboonaysiin kartaa faahfaahinadaada xidhiidhka iyo macluumaadka ku saabsan cidda kula nool app-ka TED. Waxaad kaloo awoodaa inaad nala soo xidhiidho si aad u hesho caawinaad ku aadan ka cusboonaysiinta faahfaahinadaada nidaamkayaga.

Haddii aad jeclaan lahayd inaad wax badan ka ogaato sida aan u maamulno macluumaadka iyo xogta, booqo **www.unitedwelsh.com**.



# Oggolaanshaha ku aadan wax ka beddelitaanada guriga



**Maxay tani ku saabsan tahay?**

Waa inaad United Welsh weydiisataa ogolaansho si aad wax uga bedesho gurigaaga iyo agagaarkiisa

**Maxaan u baahanahay inaan sameeyo?**

La xidhiidh United Welsh si aad u hesho foomka ogolaanshaha

Kahor intaadan wax beddelitaan ah ku samayn guriga, sida rakibashada CCTV ama ganacsi ka hawlgelinta gurigaaga, waa inaad United Welsh ka codsatid ogolaanshaha[1] ka hor intaadan sidaas samayn.

**Kani waa liiska waxyaabaha ay tahay inaad ogolaansho u hesho:**

- Ku-daridda qandaraas-hayste aad wadajir noqoneysaan. Qofka qandaraas-heysta ee aad wadajirka tihiin ayaa kula wadaagi doona mas'uuliyadda qandaraaska
- Siinta qandaraaskaaga qof kale
- Rakibitaanka CCTV
- Heysashada xayawaanka rabaayadeysan
- Ganacsi ka hawlgelinta guriga
- Ku rakibida ama ka saarida unugga iyo/ama qaybaha gaaska, korontada, biyaha ama saadadka kale ee shidaalka
- Saarida qalabyada iyo alaabada guriga (waxyaabaha ay hantidu horeyba u sii lahayd)
- Abuurista qandaraas-hoosaad (haddii aad ahayd kirayste United Welsh ka hor 1-da Diseembar 2022)

**Haddii aad heshiis sugan kula jirto United Welsh, waa inaad sidoo kale ogolaansho ugu heshaa:**

- Ka sameeynta wax ka bedelitaanka weyn guriga. Tani waxay ka dhigan tahay wax ka beddelitaano waaweyn. Haddii aadan hubin in wax ka beddelka aad rabto uu noqon doono 'wax ka beddelitaan weyn' iyo in kale, waa inaad nala soo xiriirtaa
- Ku-daridda ama ka-saarista daashka, garaash ama dhismo kale
- Siinta qandaraaskaaga ku guuleeystaha suurtagalka ah
- Ka beddelashada guryaha qandaraasle kale

1 Oggolaanshahu waa fasax-siinta ku aadan wax dhicitaanka ama heshiis ku aadan wax sameeyn.





## Weydiisashada oggolaanshaha

1. Tag ablikeeshinka United Welsh TED oo guji 'Requests' [Codsiyada]
2. Buuxi foomka 'Oggolaanshaha Mulkiilaha Guriga', adigoo bixinaya faahfaahinta ugu badan ee aad awoodo inaad bixiso
3. Marka la helo codsigaaga, United Welsh waxay haysataa hal bil si ay go'aan u qaadato ilaa 14 maalmood si ay u codsato macluumaad dheeraad ah
4. Haddii macluumaad dheeraad ah la codsado, waa inaad ku keentaa 14 maalmood gudahood.
5. United Welsh waxay haysataa hal bil si ay go'aan uga gaarto laga bilaabo taariikhda helitaanka macluumaad dheeraad ah.
6. Waxaa laguu sheegi doonaa midkood inaad ogolaansho ka haysato United Welsh; heysato ogolaansho shuruudo la socdaan, ama aadanba heysan ogolaansho.

Haddii United Welsh aysan bixin oggolaansho, waa inaan kuu sheegnaa sababta oo aanu sharaxnaa sababahayaga. Haddii aan ku siin weyno go'aan hal bil gudaheed (iyadoo la raacayo nidaamka kore) markaas waxaad haysataa ogolaanshaha ku aadan sameynta isbedelada aad codsatay.

### Oggolaanshaha lama bixinin, ama waxaa la bixiyay isagoo shuruudo wato

Waxaad codsan kartaa dib u eegis ku sameeynta go'aankayaga haddii aadan ku faraxsanayn shuruudaha, ama haddii aanu nidhaahno maya.

Dib u eegista waxaa samayn doona maareeyaha khadka ee go'aanka gaadhaha 28 maalmood gudahooda kadib codsigaaga. Warqad ayeey kuu soo qori doonaan si ay kuugu wargeliyaan go'aankooda. Haddii aadan weli ku faraxsanayn go'aanka kadib dib u eegista, waxaad ka codsan kartaa maxkamadda. Tani waxay ka dhigan tahay inaad weydiisan doonto maxkamadda inay ku amarto United Welsh inay bixiso ogolaanshaha ama tixgeliso macquulnimada shuruudaha. Tan awgeed, waxaad bixin doontaa kharashada maxkamadda.

**Oggolaanshaha ku aadan wax ka beddelitaanada guriga: Waxyaabaha ay tahay in la xasuusto**

- Waa inaad weydiisataa United Welsh ogolaanshaha ku aadan xoogaa wax ka beddelida guriga
- La xidhiidh United Welsh si aad u hesho foomka ogolaanshaha kadibna anaga noo soo dir
- United Welsh waxa laga yaabaa inay ku waydiiso macluumaad dheeraad ah ka hor inta aanay odhan haa ama maya, ama aanay odhan haa oo ay shuruudo la socdaan

**Linkiyada la xidhiidhan**
Su'aalaha Inta Badan La Isweydiiyo ee ku aadan Dowladda Welsh
https://gov.wales/renting-homes-frequently-asked-questions-tenants#section-96352

# Gudbinta gurigaaga kadib markey dhimasho kugu timaado

**Maxay tani ku saabsan tahay?**

Yaa ku noolaan kara gurigaaga dhimashadaada ka dib

**Maxaan u baahanahay inaan sameeyo?**

U sheeg United Welsh cidda kula nool iyo xiriirka kaala dhexeeya adiga

Hayso diiwaanada ku saabsan cidda kula nool

Noo sheeg qofka aad jeclaan lahayd inaad u gudbiso gurigaaga

## Wareejinta lahaanshaha sharciga ahi macnaheedu waa marka aad dhimato, waxaad u gudbin kartaa gurigaaga xubin kale oo qoyska ah ama daryeele kula nool.

Gurigaaga, **la-wareegaha lahaanshaha ee sharciga ah** waa qofka la sii wadi kara qandaraaskaada United Welsh dhimashadaada kadib. Tani macnaheedu waa inay masuul ka noqon doonaan qandaraaska oo ayna ku sii noolaan karaan guriga. Wareejinta lahaanshaha sharciga ahi waa ficilada iyo habka uu raacayo qofkani si uu u dhaxlo qandaraaskaada.

Haddi uu jiro qof **wada jir aad u wada heystaan qandaraaska** gurigaaga, waxay sii heysan doonaan qandaraaskooda ku aadan guriga.

**Yaa noqon kara a-wareegaha lahaanshaha ee sharciga ah?**

Waxaa kujira laba nooc oo la-wareegaha lahaanshaha ee sharciga ah gudaha qandaraaskaaga.

**1**. La-wareegaha lahaanshaha sharciga ah ee **mudnaanta leh**

· Lammaanka (seyga ama xaaska)

· Lammaanaha rayidka ah

· Qof kula nool sida xaas ama lammaane rayid ah

Qofkani waa inuu kula noolaadaa oo gurigaagu waa inuu ahaada gurigooda kaliya ama gurigooda aasaasiga/ugu muhiimsan[2] wakhtiga dhimashadaada.

La-wareegaha lahaanshaha sharciga ah ee mudnaanta leh ayaa marka hore dhaxli doona qandaraaskaada (haddii uusan jirin qandaraasle kula-wadaag ah.)



2 Ugu muhiimsan(Principal) macneheedu waa marka hore siday ugu kala muhiimsan yihiin, guriga ugu weyn/humiimsan ee qofka

**2.** La wareegaha lahaanshaha sharciga ah ee **kaydka ku jira**

· Lammaane ama lammaanaha rayidka ah, ama qof kula nool sida xaas ama lammaane rayid ah, kaas/taas oo ahayn la wareegaha lahaanshaha sharciga ah ee mudnaanta leh

· Xubin qoyska ka mid ah

· Daryeele

**Waxaa jira xeerar ku saabsan cidda loo oggol yahay inuu noqdo dhaxal-sugaha kaydka ku jira. Lammaanaha ama lammaanaha rayidka ah, waa inay:**

⊗ San noqon dhaxal-sugaha mudnaanta leh

✓ Kula noolaayeen adiga oo uuna ahaa guriga keliya ee ay ku hoydaan ama aasaasiga/ugu muhiimsan wakhtiga geeridaada.

**Xubnaha qoyska, waa inay:**

⊗ San noqon dhaxal-sugaha mudnaanta leh

✓ Noqdaan waalidkaa, awoowahaa/ayeeyadaa, ubadkaaga, cunug aad awow u tahay, walaalkaa, walaashaa, adeerkaa, abtiga, wiilkaad adeerka/abtiga u tahay ama gabadha aad abtiga/adeerka u tahay. Tan waxaa ku jira walaalo uun uu dhalay hal ka mid ah waalidkaada, ilmo adeer iyo xiriirada ku imaada guurka

✓ Kula noolaayeen adiga oo uuna ahaa guriga keliya ee ay ku hoydaan ama aasaasiga/ugu muhiimsan wakhtiga geeridaada

✓ Kula noolaayeen 12 bilood ka hor dhimashadaada.

**Haddeey ahaan lahayd daryeelayaasha, waa inay:**

⊗ San ahaanin la wareegaha lahaanshaha sharciga ah ee mudnaanta leh

✓ Ku siiyaan ama ku talo jiraan inay kugu siiyaan daryeel baaxad weyn si joogto ah*

✓ Kuu ahaayeen daryeele adiga ama xubin qoyskaaga ah oo kula nool wakhti kasta gudaha 12-ka bilood ka hor imaanshada geeridaada

✓ Kula noolaayeen adiga oo uuna ahaa guriga keliya ee ay ku hoydaan ama aasaasiga/ugu muhiimsan wakhtiga geeridaada

✓ Kula noolaayeen 12 bilood ka hor dhimashadaada

* Tan kuma jiraan daryeelka la bixiyay sabab ah heshiis, sida heshiis shaqo.

**Dadka da'doodu ka yar tahay 18 sano ama dadka leh heshiis-hoosaadka ma noqon karaan la-wareegaha lahaanshada ee sharciga ah.**

## Labo la-wareegitaano lahaansho oo sharci ah

Gurigaaga waxa la isku gudbin karaa ugu badnaan laba jeer.

Haddii uu jiro la-wareegaha lahaanshaha sharciga ah ee mudnaanta leh iyo la-wareegaha lahaanshaha sharciga ah ee kayd ku jiray: La-wareegaha lahaanshaha sharciga ah ee mudnaanta leh ayaa marka hore la wareegaya heshiiskaaga, ka bacdiba la-wareegaha lahaanshaha sharciga ah ee kayd ku jira ayaa la wareegaya heshiiska ka dib geerida la-wareegaha lahaanshaha sharciga ah ee mudnaanta leh

**ama**

Haddii uun kaliya jiro la-wareegaha lahaanshaha sharciga ah ee mudnaanta La-wareegaha lahaanshaha sharciga ah ee mudnaanta leh ayaa la wareegaya heshiiska wuxuuna dhammaanayaa ka dib geeridiisa/geerideeda

**ama**

Haddii kaliya jiro la-wareegaha lahaanshaha sharciga ah ee kayd ku jira: La-wareegaha lahaanshaha sharciga ah ee kaydka kujira ayaa la wareegaya heshiiska wuxuuna dhammaanayaa ka dib geeridooda.

Haddii ay jiraan laba ama in ka badan oo ah la-wareegayaasha lahaanshaha sharciga ah ee mudnaanta leh ama laba ama in ka badan oo ah la-wareegayaasha lahaanshaha sharciga ah ee kaydka kujira , la wareegayaasha sharciga ahi ayaa laga yaabaa inay ku heshiiyaan cidda heshiiska qaadanaysa. Haddii aysan ku heshiin ama aysan u sheegin United Welsh cidda qaadaneysa heshiiska, United Welsh ayaa go’aansan karta.

Haddii United Welsh ay go’aansato, la wareegaha(yaasha) lahaanshaha sharciga ah ee aan qaadan heshiiska waxay rafcaan uga qaadan karaan maxkamadda afar toddobaad gudahood marka United Welsh ay ogeysiiso inaan la xullan.

## Goorma ayay dhici doontaa kala wareegida lahaanshaha ee sharciga ah

Heshiiska gurigaaga waxa uu noqonayaa masuuliyada la-wareegaha lahaanshaha ee sharciga ah hal bil kadib dhimashaadaada. Waxay heli doonaan heshiis cusub oo qeexaya waajibaadkooda ka heshiis-heysta ahaan 14 maalmood gudahood.#

La wareegaha lahaanshaha ee sharciga ahi ma bixin karo ogaysiis uu ku dhameenayo heshiiska lix bilood gudahooda ka dib marka uu guuleysto haddii ay jiraan kuwo kale oo ah la wareegayaasha lahaanshaha sharciga ah ee u qalma.

## Xafiditaanka diiwaanada iyo cusboonaysiinta macluumaadkaaga

Waa inaad xafiddaa diiwaannada caddaynaya cidda kula nool. Tusaale ahaan, biilasha muujinaya magacyadooda iyo cinwaankooda.

Waa mas’uuliyaddaada inaad caddayso cidda ku noolaan karta gurigaaga dhimashadaada ka dib, markaa fadlan dukumentiyada si ammaan ah u ilaali.

Waa inaad sidoo kale la socodsiisaa United Welsh cidda kula nool iyo xiriirka kaala dhexeeya iyaga.

**Gudbinta gurigaaga kadib markey dhimasho kugu timaado: Waxyaabaha ay tahay in la xasuusto**

- Haddi uu jiro qof aad si wada jir ah ugu wada jirtaan heshiiska gurigaaga, waxay qaadan doonaan heshiiska dhimashadaada kadib
- Gurigaaga waxa uun la kala gudbin karaa ilaa laba jeer, marka hore qofka ah la wareegaha lahaanshaha sharciga ah ee mudnaanta leh ka dibna la wareegaha lahaanshaha sharciga ah ee kaydka kujira
- Waxaa jira sharciyo ku saabsan cidda noqon karta la wareegaha lahaanshaha sharciga ah iyo goorta ay qaadan karaan heshiiskaada
- Waa inaad xafiddaa dukumeentiyada iyo diiwaannada caddaynaya cidda kula nool. Tani waxay kaa caawin doontaa in la caddeeyo cidda gurigaaga loo gudbin karo dhimashadaada ka dib
- Heshiiskaagu waxa uu noqonayaa masuuliyada la-wareegaha lahaanshaha ee sharciga ah hal bil kadib dhimashadaada
- U sheeg United Welsh cidda aad jeclaan lahayd inaad ku wareejiso gurigaaga oo waxaan xaqiijin doonnaa inay u qalmaan inay qaataan heshiiskaada.

# Ka yagleelida/dhigida gurigaaga mid ku habboon in lagu noolaado

**Maxay tani ku saabsan tahay?**

Ka dhigida gurigaaga ammaan iyo mid ku jiro xaalad wanaagsan

**Maxaan u baahanahay inaan sameeyo?**

Soo sheeg wixii dayactiro iyo burbur ah sida ugu dhakhsaha badan

U oggolow shaqaalaha iyo qandaraaslayaasha inay soo galaan gurigaaga si ay u sameeyaan dayactir iyo hubinada la xidhiidha badbaadada

Hayso tilmaamaha sida loo isticmaalo nidaamyada tasiilaadkaada

United Welsh waa inay xaqiijisaa in gurigaagu ku habboon yahay in lagu noolaado. Waa inaad sidoo kale daryeeshaa guriga, adoo markaa ku ilaalinaya si nadiif iyo xaalad wanaagsan ah.

Celtic Horizons waxay u qabataa hawlaha dayactirka iyo hagaajinada United Welsh.

Haddii dayactir loo baahdo ama gurigaagu uu waxyeello soo gaaro, fadlan la xidhiidh Celtic Horizons sida ugu dhakhsaha badan. Waxay kaala talin doonaan sida loo sameeyo dayactirka ama waxey kuu soo qabanqaabin doonaan koox si ay u sameeyaan.

### Dayactirka, badbaadada iyo koranto tijaabinta

Meesha uu heshiiskaadu ula jeedo 'ku habboonaanta deegaanka aadanaha', tani waxay ku saabsan tahay in United Welsh ay xaqiijineyso in gurigaagu fiican yahy oona ammaan yahay.

Sharciga Guryo Kireeynta ayaa qeexaya 29 xaaladood oo ay tahay in aan tixgelinno si aan gurigaaga uga dhigno mid taam u ah in lagu noolaado.

Sida ugu dhakhsaha badan ee aan u ogaano wixii walaac ah ama arrimo ah oo ku saabsan gurigaaga, ayaa u dhigmeysa sida ugu dhakhsaha badan ee aan gacan uga geysan karno xallintooda, markaa fadlan kala xiriir Celtic Horizons:

· Wac 0330 159 6080 (riix 1); ama

· Farriin uga dir gudaha app-ka TED

### Si aan gurigaaga ugu yagleelno mid badbaado ah, waa inaan:

- Sameeyn kormeerka badbaadada ee ku aadan korantada ugu yaraan hal mar shantii sanaba oo aana ku siinaa koobiga warbixinta kormeerka
- Ku xidhnaa alaarmiga qiiqa ee sida adag fiillada ugu duuban dabaq/sagxad kasta oo gurigaaga ka mid ah
- Ku xidhnaa alaarmiga kaarboon monoksaydhka qol kasta oo gurigaaga ka mid ah oo uu jiro qalab gaaska.

Waxaan sidoo kale ku eegi doonaa in alaarmiyadan ay shaqeynayaan kormeerka badbaadada ee sannadlaha ah ee lagu sameenayo gurigaaga. Tan waxa ka mid noqon doona eegitaanka nidaamka kulaylintaada iyo in lagu siiyo shahaadada nabdoonaanta gaaska haddii gurigaagu leeyahay kululeeyaha gaaska.

**Gelitaanka gurigaaga**

Waa inaad u ogolaataa shaqaalahayaga iyo qandaraaslayaashayada inay gurigaaga u soo galaan si ay u sameeyaan dayactir iyo hubinada la xidhiidha badbaadada. Waxaan horayba kuugula heshiin doonaa taariikh iyo waqti.

Haddii aad u diido gelitaanka shaqaalahayaga ama qandaraaslayaashayada gurigaaga taariikhda iyo wakhtiga lagu heshiiyey, waxa laga yaabaa inaan dib kuugu dalacno ballanta aad seegtay.

**Dib-U-Dalicitaanada**

Haddii United Welsh ay tahay ineey bixiso kharashka dayactirto shay aad mas'uul ka tahay, sida waxyeellada aad geystay adiga ama booqde, waxaan kugu dallaci doonaa kharashka shaqada.

Tan waxa ka mid ahaan karaa shaqada dayartirka ee la sameeyay ka dib marka uu dhamaado heshiiskaaga haddii ay waxyeeladu dhacday markii aad ahayd heshiis-heystaha guriga.

**Guryaha cagaaran**

Heshiiskaadu waxa uu tixraacayaa istiraatijiyadayada ku aadan ebar ahaanshaha kaarboonka. Guryuhu ayaa ka danbeeyaan qiyaastii 20% qiiqa kaarboonka gudaha Boqortooyada Ingiriisla, markaa waa muhiim in United Welsh ay doorkeeda ka qaadato sidii ay u dhisi lahayd guryo cagaaran oo ay ka dhigto guryaheena kale kuwo u roon deegaanka.

Tusaale ahaan, guryaha cusub ee ay dhistay United Welsh uma isticmaalaan gaaska wax kulaylinta. Fadlan xaqiiji inaad heysato dhammaan tilmaamaha lagugu siiyay isticmaalka nidaamyada tamarta ee gurigaaga.

Haddii aad ku nooshahay guri duug ah, United Welsh ayaa kaagala shaqayn doontaa sanadaha soo socda si aad u bedesho qaab-dhismeedka iyo nidaamka gurigaaga.

**Ka yagleelida/dhigida gurigaaga mid ku habboon in lagu noolaado: Waxyaabaha ay tahay in la xasuusto**

- Waa muhiim inaad gurigaaga ku ilaaliso mid nadiif iyo xaalad wanaagsan ah
- Dayactirka iyo waxyeellada waa in lagu wargeliyaa Celtic Horizons sida ugu dhakhsaha badan
- Waa inaad u ogolaataa shaqaalahayaga iyo qandaraaslayaashayada inay soo galaan gurigaaga si ay u sameeyaan dayactir iyo hubinada badbaadada ee sannadlaha ah
- Waxaa laga yaabaa in lagugu dalaco lacagta shaqada dayactirka haddii adiga, ama qof kula nool ama ku soo booqday, uu sababay dayactirka ama waxyeellada
- Hayso tilmaamaha lagu siiyay ee ku saabsan sida loo isticmaalo nidaamyada tasiilaadkaada

**Linkiyada la xidhiidhan**

Qeybta 91 – Xeerka Guryo Kireysashada (Wales) ee 2016

https://www.legislation.gov.uk/anaw/2016/1/section/91

Ku haboonaanta deegaan aadane – Hagitaanka qandaraas-heystayaasha

https://gov.wales/fitness-human-habitation-guidance-tenants-contract-holders-html

Yoolal United Welsh ee ku aadan Cagaarinta

https://www.unitedwelsh.com/green-goals/

# Dhaqanka lidka ku ah hab-dhaqanka bulshadae

**Maxay tani ku saabsan tahay?**

Waa hab-dhaqanka aan laga aqbali karin gudaha gurigaaga iyo bulshada dhexdeeda

**Maxaan u baahanahay inaan sameeyo?**

La soco in United Welsh ay ka dalban karto maxkamad in ay dhameyso qandaraaskaada haddii aad u dhaqanto si lid ku ah hab-dhaqanka bulshada.

Gudaha qandaraaskaada, ereyga 'akhlaaqda la mamnuucay' wuxuu ku saabsan yahay wax aan la aqbali karin, dhaqan lid ku ah hab-dhaqanka bulshada. Haddii aad u dhaqanto qaab ay United Welsh u aragto dhaqan ah mid la mamnuucay, waxaanu qaadi karnaa tallaabo aanu ku dhameeneyno qandaraaskaada.

Kani waa liiska noocyada hab-dhaqanka oo aynaan u qaadanayn kuwo la aqbali karo. Liiskani ma'aha mid ka kooban dhamaan suurtagalnimooyinka[3]

| | |
|---|---|
| 1. | Kharibida ama si ula kac ah u waxyeeleeynta gurigaaga. Tan waxaa ku jira meel kasta oo lala wadaago deriska iyo mid kasta oo ka mid ah guryaha iyo xafiisyada kale ee United Welsh. Adiga ayaa mas'uul ka ah bixinta kharashka dayactirka. |
| 2. | U oggolaanshaha xayawaan kasta, shimbir, cayayaan, xamaarato ama xayawaanada rabaayada ee kale inuu qof ama hantida u keeno dhib ama xanaaqitaan. Haddii ay tani dhacdo, United Welsh waxay ka bixi kartaa oggolaanshaha ku aadan heysashada xayawaanka rabaayada ah, ama haynta xayawaanka rabbaayadda ah gabi ahaanba. Eeyaha waa in lagu hayaa xarig-hogaaneedka marka aad gurigaaga ka baxsan tahay. Waa inaysan xumeeyn goobaha kasta ee la wadaago. |
| 3. | Ku baarkin gareesashada meel kasta oo gaadhigaagu ugu keeni karo qof dhib ama waxyeelo u gaysan karo dhulka United Welsh. Baabuurta waa in had iyo jeer la baarkin gareeystaa iyada oo la tixgelinayo kuwa kale ee isticmaalaya wadada. Waa inaysan xannibin baabuurta kale ama aysan xannibin adeegyada xaaladaha degdegga ah. |
| 4. | Ku baarkin gareeysashada baabuur kasta oo aan la canshuurin ama mudneeyn inuu jidka ku socdo agagaarka dhulka ku hareereysan gurigaaga,meel kasta oo baarkinada la wadaago ama wadada ah. |
| 5. | Ku baarkin gareeysashada rimoor, is-jiide, doon, baabuur ganacsi, HGV, baaskiil afar geeslaha ah ama mooto yar meel kasta oo baarkinada la wadaago ah ama dhul kasta oo ku hareeraysan gurigaaga haddii aanad ogolaansho ka haysan United Welsh. Waxa laga yaabaa inaan ku siinno ogolaansho shuruudo wataan waxaana laga yaabaa inaan ka laabano ogolaanshaha haddii aan haysano sabab wanaagsan. |
| 6. | Ku sameeynta dayactiritaan baabuur haddii ay taasi ku keeni karto dhib ama waxyeelo hanti kasta. |

3 Tixgelinta dhamaan walxaha suurtagal ah macnaheedu waa in lagu daro dhammaan fursadaha suurtagalka ah

| | |
|---|---|
| 7. | U oggolaanshaha ama u fasaxida qof ku soo booqanaya inuu ku baarkin gareeysto meelaha baarkinada ee keliya loogu talagalay dadka degganayaasha ah. |
| 8. | Ku baarkin gareeysashada, isticmaalida ama ku kaxeeynta baaskiilka afar geeslaha ah ee sharcida darida ku ah in lagu ka xeeyo meelaha aan wadada ahayn, mooto yar ama baabuur kale oo kasya oo laga yaabo inaan si sharci ah loogu kaxeynin waddo ku taal agagaarka gurigaaga ama dhul kasta oo ay leedahay United Welsh. |
| 9. | Ku baarkin gareeysashada ama ku jaajar-gareeysashada mootooyinka dhaqdhaqaaqa meel kasta oo la wadaago oo ku hareeraysan gurigaaga ilaa aad ogolaansho ka haysato United Welsh. Waxa laga yaabaa inaan ku siinno ogolaansho shuruudo wataan waxaana laga yaabaa inaan ka laabano ogolaanshaha haddii aan haysano sabab wanaagsan. |
| 10. | Waxyeeleeynta geedaha, dhirta iyo doogaga kale ee horeyba u sii beernaa. Waa inaadan u oggolaan geedaha, dhirta iyo doogaga inay ka kor lal-madaan dariiqyada lagu socdo ama ay ku baxaan dhulka deriskaaga. Deyryada waa in la ilaaliyaa oo aana laga dheerayn lix fiit. |
| 11. | Uga tagida qashinka meel kasta oo aan ahayn haamaha ama meelaha kale ee loogu talagalay ku aruurinta qashinka. Bacaha ama haamaha qashinka lagu guro waa in aanay loo bixinin dibadda si loo qaado ka hor 6 maqribnimo maalinta ka horreysa in la soo qaado. |
| 12. | Ku kaydinta walxaha dabka sida fudud u qabsan karaan, gaas dhalooyinka kujiraan, barafin, baatroolka ama alaab kasta oo kale oo khatar ah gurigaaga, meelaha la wadaago ama dhulka ay leedahay United Welsh. |
| 13. | Ku rakibida qalabka CCTV gurigaaga adiga oo aan ogolaansho ka haysan United Welsh. |
| 14. | Ku cabida sigaar meel kasta oo la wadaago, meelaha ay bulshadu wadaago ee gudayaasha dhismooyinka ah. |

**Si fiican ula-dhaqan dadka kale**

Waa inaadan caayin, u hanjabin, dhibaatayn, u keenin lab iyo qas, ka cadhaysiin ama qasin qof kastoo kale.

Tan waxaa ka mid ah:

• Derisyada

• Qoyskooda iyo booqdayaashooda

• Mid kasta oo ka mid ah kuwa ka haysta qandaraasyada United Welsh

• Qof kasta oo kale oo jooga aagga maxalliga ah

• Shaqaalaha United Welsh, qandaraaslayaasha iyo iskood wax u qabtayaasha

• Dabeecadaha farageliya awoodaha United Welsh si ay u maareeyaan qandaraaskaaga ama qandaraasyada dadka kale waa wax aan la aqbali karin.

**Sidoo kale waa inaadan:**

Sababin ama ugu hanjabto rabshad dadka ku nool gurigaaga, oo ay/uu ku jirto/jiro lammaanahaaga ama qoyska lammaanahaaga. Sameeyn xadgudubka ka dhaca guriga ee noocyo kala duwan ah waxaa loogu kala sooci karaa sida hab-dhaqan la mamnuucay (sida xadgudub jireedka, galmeedka, maskaxeedka, shucuureedka ama mid maaliyadeed)

U isticmaalin gurigaaga, meel kasta oo bulsheed ah oo la wadaago ama aagga maxalliga ah fal dambiyeed kasta, sida ku haysashada, iibinta ama ku isticmaalka daroogada ama walxaha kale ee la xakameeyey, ama ku kaydinta ama ku iibinta alaabada la soo xaday.

Sababin ama oggolaanin wax kastoo lab iyo qas buuqeed ah. Buuqa lab iyo qaska ah waa qaylo/buuq xad dhaaf ah[4] kaas oo wakhti kasta laga maqli karo meel ka baxsan gurigaaga ama meelaha la wadaago taasoo sababi karta dhib ama ka cadhaysiinta dad kale.



4 Xad-dhaafka ah macnaheedu waa in ka badan inta loo baahan yahay, caadiga ah, ama la rabi lahaa

JHaddii aad u malaynayso in qandaraas-ka-heystaha United Welsh uu u dhaqmayo hab loo tixgalin karo anshax la mamnuucay, fadlan noo soo sheeg annaguna waan kula talin doonaa.

**Dhaqanka lidka ku ah hab-dhaqanka bulshada: Waxyaabaha ay tahay in la xasuusto**

- Qandaraaskaagu wuxuu ka hadlaa 'hab-dhaqanka la mamnuucay'. Tani waxay ka dhigan tahay dhaqan lid ku ah hab-dhaqanka bulshada ee aan la aqbali karin
- Haddii aad u dhaqanto si ka soo horjeeda hab-dhaqanka bulshada, United Welsh waxay qaadi kartaa tallaabo ay ku dhammeeyn karo qandaraaskaada
- Haddii aad kala kulanto dhaqan lid ku ah hab-dhaqanka bulshada qof qandaraas ka haysta United Welsh, noo soo sheeg.


**Linkiyada la xidhiidhan**

Qeybta 55 – Xeerka Guryo Kireeynta (Wales) ee 2016

**https://www.legislation.gov.uk/anaw/2016/1/section/55**



# Wadajir u-haystayaasha qandaraaska



**Maxay tani ku saabsan tahay?**

Waa dadka la wadaaga mas'uuliyadda qandaraaskooda dadka kale

**Maxaan u baahanahay inaan sameeyo?**

Ogsoonow in wadaagayaasha qandaraaska ee wadajirka ah lagu dari karo; lagala laaban karo qandaraaskooda, ama la dhameeyn karo qandaraaskooda.

**Wadajir u wadaagaha qandaraaska** waa qof sidoo kale ka heysta qandaraaska kireeynta gurigaaga United Welsh . Qandaraas-wadaage kastaa wuxuu wadaagayaa mas'uuliyadda ku aadan raacitaanka qaandaraaska, sida bixinta kirada iyo daryeelida guriga.

### Ku-daridda qandaraas-wadaage

Si aad ugu darto qandaraas-wadaage gurigaaga, waa inaad United Welsh ka codsatid ogolaansho.

Haddii United Welsh ay ogolaato qandaraas-wadaagaha wadajir ah ee cusub, qof kasta oo ku lug leh (adiga, qandaraas-wadaagaha wadajir ah ee cusub iyo xubin ka tirsan shaqaalaha United Welsh) waa inay saxiixaan dukumeenti.

United Welsh waxa laga yaabaa inay tidhaahdo maya inay ku darto qof haysta qandaraas gurigaaga. Waxaan dhihi karnaa maya haddii aan u maleyno inay macquul tahay inaan diidno sida hoos timaada Jadwalka 6 ee Sharciga/Xeerka Guryo Kireeynta (Wales) ee 2016.

### Ku wareejinta qandaraaskaada qandaraas kula wadaagahaada

- Haddii aad tahay qandaraas wadaage, waxaad qaybtaada qandaraaska siin kartaa qof kale oo qandaraas wadaag ah
- Tan waxaa loo yaqaan wareejinta qandaraaskaaga haddii aadna wareejiso, waxaad ka tanaasuleysaa dhammaan xuquuqahaaga iyo masuuliyadahaaga hantida
- Waa in aad ogolaansho ka heshaa United Welsh si aad wax u wareejiso waxaana laga yaabaa in aan shuruudo ku siino ka hor inta aan kula heshiin. Tusaale ahaan, waxaa laga yaabaa in lagu weydiiyo inaad bixiso kiro kasta oo lagugu leeyahay ka hor inta aan la oggolaan wareejinta.

### Haddii qof qandaraas wadaage ah uu rabo inuu dhameeyo qandaraaskooda

Qofka qandaraaska wadaagu waa inuu ogeysiiyaa United Welsh haddii ay rabaan inay dhameeyaan qandaraaskooda. Waxay tan si rasmi ah u sameeyaan iyagoo soo gudbinaya 'ogaysiis ka bixitaan'

• Waa inay sidoo kale ku wargeliyaan kuwa kale ee qandaraas-la-wadaagayaasha ah inay rabaan inay dhameeyaan qandaraaskooda iyagoo u soo diraya 'feejignaan qoran'

• United Welsh kuma dhameeyn karto qandaraas wadajirka ah wax ku salaysan ficil ka yimid mid ka mid ah qandaraaslayaasha wadaagayaasha iyada oo aan lala xiriirin kan(kuwa) kale.

• Muddada ugu yar ee ay tahay in ogeeysiiska ee uu qandaraas wadaaguhu ku dhameeyn karo qandaraaskiisa waa hal bil

• Qandaraas wadaage ayaa sidoo kale weydiisan karaa United Welsh inay u gudbiyaan qandaraaskooda qof kale.

Qandaraasle-wadaagaha (J) wuxuu u soo dirayaa ogeysiiska ka bixitaanka si uu ugu sheego in United Welsh ay dhameeyso qandaraaskooda

↓

Muddada ugu yar ee loo baahan yahay in lagu bixiyo ogeysiiska si loo dhammeeyo qandaraasku waa hal bil . Ogeysiiska ka bixitaanku waa inuu qeexaa taariikhda J uu rabo inuu dhameeyo qandaraaska

↓

J waa in uu siiyaa qoraal 'feejignaan oo qoran' kuwa kale ee la wadaaga qandaraaska (O) si uu ugu ogeysiiyo iyaga inay rabaan inay dhameeyaan qandaraaska . Tani waa in la sameeyaa isla wakhtiga ogeysiiska ka bixitaanka la siinayo United Welsh waana in lagu lifaaqaa ogeysiiska ka bixitaanka ee la siiyay United Welsh

↓

United Welsh waxay sidoo kale u soo direysaa feejignaan qoran O taas oo ay ku lifaaqan tahay ogeysiiska ka bixitaanka. United Welsh waa inay tan sameyso sida ugu dhakhsaha badan ee macquulka ah ka dib markay hesho ogeysiiska ka bixitaanka

↓

Laga bilaabo taariikhda ka bixitaanka ee lagu heshiiyey, J ma sii ahaan doono qandaraas-wadaage

## Ka-saaridda qandaraas-wadaagaha wadajirka ah

**1.** Qandaraas-wadaagaha wadajirka ah wuxuu codsan karaa qandaraaska wadajirka qandaraas-wadaage kale inuu dhammaado sababtoo ah kuma sii noola guriga.

**Haddii aad rabtay inaad sidan samayso, waxaad:**

U soo dir 'ogaysiis ujeedo' United Welsh

→

Dhameeneysaa/ buuxineysaa jeegaga si aad u caddayso in wadaagaha qandaraasku aanu hadda ku sii noolayn guriga

→

Kadib muddo afar toddobaad ah oo digniin ah, waxaad ka codsan kartaa maxkamadda inay saarto qandaraaska qofka

**2.** United Welsh ayaa sidoo kale saari kartaa qandaraas-wadaagaha wadajirka ah sababtoo ah kuma sii noola guriga mar dambe.

**Si tan loo sameeyo, United Welsh waxay:**

U diri doontaa 'ogaysiis ujeedo' qandaraas-wadaagaha wadajirka ah. Tan waxaa ku jiri doona taariikh calaamadeysa muddada afarta toddobaad ee digniinta ah

→

Dhameeneysaa/ buuxineysaa jeegaga si aad u caddayso in wadaagaha qandaraasku aanu hadda ku sii noolayn guriga

→

U diri doontaa 'ogaysiis ka-saarid' kaas oo dhaqan gelayaa siddeed toddobaad kadib taariikhda ogeysiiska

**3.** United Welsh waxeey u saari kartaa qandaraas-wadaage wadajirka ah sabab ah u dhaqmitaankooda si ka soo horjeeda hab-dhaqanka bulshada..

Si tan loo sameeyo, United Welsh waxay:

| U diri doontaa 'ogaysiis ujeedo' qandaraas-wadaagaha wadajirka ah. Tan waxaa ku jiri doona taariikh calaamadeysa muddada afarta toddobaad ee digniinta ah | → | U diri doontaa 'ogaysiis ujeedo' qandaraas-wadaagaha(yaasha) wadajirka ee kale | → | Ka codsan doontaa maxkamadda maalinta ama ka dib maalinta ogeysiinta dhameeynta qandaraaska |
|---|---|---|---|---|

Haddii qandaraas-wadaage wadajirka ah uu dhinto, dhammaan xuquuqaha iyo waajibaadka qandaraasku waxay ku harayaan qandaraas-wadaagaha(yaasha) wali sii nool.

**Si wadajir u haystayaasha qandaraaska: Waxyaabaha ay tahay in la xasuusto**

- Si aad ugu darto qandaraas-wadaage gurigaaga, waa inaad United Welsh ka codsatid ogolaansho
- United Welsh waxa laga yaabaa inay tidhaahdo maya inaad ku darto qandaraas-wadaage wadajir ah haddii aanu u malaynayno inay macquul tahay marka loo eego Jadwalka 6 ee Xeerka Guryo kiraynta
- Qandaraas-wadaagaha wadajirka ah ee raba inuu dhameeyo qandaraaskiisa/keeda waa inuu u soo gudbiyaa 'ogaysiis ka bixitaan' United Welsh iyo kuwa kale ee qandaraas-wadaagayaasha wadajirka ah
- Qandaraas-wadaagaha wadajirka ama United Welsh waxay soo gudbin karaan 'ogaysiis ujeedo' si ay u dhameeyaan qandaraaska qandaraas-wagaage wadajir ah haddii aysan ku sii noolayn guriga mar danbe.
- United Welsh waxay ka codsan kartaa maxkamadda inay dhameeyso qandaraaska qandaraas-wadaagaha wadajirka ah haddii ay u dhaqmaan si ka soo horjeeda hab-dhaqanka bulshada
- Qandaraas-wadaage wadajir ah ayaa u wareejin karaa qandaraaskiisa mid kale oo qandaraas-wadaage wadajir ah

**Linkiyada la xidhiidhan**


Jadwalka 6 - Xeerka Guryo Kireynta(Wales) ee 2016

**https://www.legislation.gov.uk/anaw/2016/1/schedule/6**

Su'aalaha Inta Badan La Isweydiiyo ee ku aadan Dowladda Welsh

**https://gov.wales/reting-homes-frequently-asked-questions-tenants**

# Dhameeynta qandaraaskaada



**Maxay tani ku saabsan tahay?**

Sida loo dhameeyo qandaraaskaada ee aad kula jirto United Welsh

**Maxaan u baahanahay inaan sameeyo?**

Noo sheeg ugu yaraan adigoo nasii siinaya afar toddobaad oo ogeysiis ah

**Haddii aad ka guureyso gurigaaga, waa inaad la xiriirtaa United Welsh si aad u dhameeyso qandaraaskaada. Muddada ogeysiiska ugu yar ee lagu dhameeyn karo qandaraaskaada waa afar toddobaad.**

Marka uu qandaraaskaadu dhamaado, xaq uma lihid inaad gasho ama ku noolaato guriga. Si kastaba ha ahaatee, waa inaad bixisaa ijaar kasta oo lagugu leeyahay, sidoo kale waxaa laga yaabaa inaad bixiso kharashka dayactirka ama waxyeelada guriga ee soo gaaray markaad ahayd qandaraasle-haystaha.

## Sida loo bixiyo ogaysiis aad ku dhameeneyso qandaraaskaada

1. La xidhiidh United Welsh →
2. Nasz przedstawiciel wypełni z Tobą formularz wypowiedzenia →
3. Waxaan kuugu soo diri doonaa foomka si aad u saxiixdo kadibna aad dib noogu soo celiso. →
4. Qandaraaskaagu wuxuu dhammaan doonaa Axadda ka dib muddada ogeysiiska ee afarta toddobaad ah.

Ma dhameeyn kartid qandaraaskaada haddii aad ku tahay dhaxal-suge qandaraaska oo qandaraaskuna uu hoos imaaday mas'uuliyaddaada lixdii bilood ee ugu dambeysay.

### Sida United Welsh ay u dhamayn karto qandaraaskaada

**1.** Haddii aad jebiso shuruudaha qandaraaskaada, waxaanu qaadi karnaa tallaabo aanu ku dhameeyn karno.

'Sheegashada lahaanshaha' waa habka ay United Welsh raacdo si ay uga codsato maxkamadda si loo dhameeyo qandaraaskaada. Tusaale ahaan, United Welsh waxay bilaabi kartaa sheegashada lahaanshaha haddii aad u dhaqanto si ka soo horjeeda

hab-dhaqanka bulshada ama haddii aad qabto deymo kiro oo culculus[5]

**2.** Haddii aad ka tagto gurigaaga, United Welsh waxay dhamayn kartaa qandaraaskaada umana baahnin inaan ka codsano maxkamadda si aan sidaas u samayno. Waxaan ku siin doonaa ogeysiis afar todobaad ah oo digniin ah, waxaan ku samayn doonaa jeegaga ka dibna ku ogeysiin doona in qandaraaskaagu dhammaaday.

Haddii United Welsh ay rabto inay dhammayso qandaraaskaada guriga, waxaanu samayn karnaa tan annagoo ku siinayna ogeysiis ah in xuquuqdaada ku aadan ku jirida guriga ay dhammaanayso taariikhda la cayimay. Habkan ku dhameeynta qandaraaska waxa uu khuseeyaa dadka qandaraasyada caadiga ah heysta oo kaliya. Waxaa jira xayiraaddaha[6] loogu tala galay marka ay dhici karto.

### Dhammeeynta heshiiskaada: Waxyaabaha ay tahay in la xasuusto

- Haddii aadan sii rabin inaad ku noolaato gurigaaga, waa inaad u sheegtaa United Welsh inaad rabto inaad dhameeyso heshiiskaada
- Waa inay jirtaa ugu yaraan muddo ogeysiis ah oo afar toddobaad ah ka hor inta uusan dhammaan qandaraaskaagu/heshiiskaagu
- Qandaraaskaagu wuxuu dhammaan doonaa Axadda ka dib muddada afarta toddobaad ah
- Waa inaad bixisaa ijaar kasta oo lagugu leeyahay. Waxa kale oo laga yaabaa inaad u baahato inaad bixiso kharashyada dayactirka
- United Welsh waxay qaadi kartaa tallaabo ay ku dhameeyso qandaraaskaada haddii aad jebiso shuruudaha qandaraaska

**Linkiyada la xidhiidhan**
Su'aalaha Inta Badan La Isweydiiyo ee ku aadan Dowladda Welsh
**https://gov.wales/renting-homes-frequently-asked-questions-tenants**

5 Sheegashada lahaanshaha ee salka ku haysa deymaha kirada culculus ee lagugu leeyahay waxay khusaysaa oo kaliya qandaraa-heystayaasha ka haysta Qandaraaska Shaqo ee caadiga ah United Welsh.

6 Xayiraadaha waxaa loola jeedaa xaddididda xaaladaha ama cabbirada, wax xaddidaya ficillada qof

# Macluumaadka kale ee muhiimka ah

**Degayaasha/Kireystayaasha**

Haddii aad ka fekereyso inuu dege/kiresyte kula soo dego, waa inaad marka hore la hadashaa United Welsh.

Qandaraaskaagu waxa uu ku siinayaa xaq aad ku soo dejiso kireyste, laakiin tani waxay ku xidhnaan doontaa inta uu le'eg yahay gurigaaga, iyo tirada dadka loo ogol yahay inay ku noolaadaan halkaas.

.

# Xusuus Qoritaano